# Maareynta Biyaha La Socda Duufaanta

## Sharciyada lagu ilaaliyo biyaha deegaankaaga

### Laga bilaabo jidadka magaalada ilaa harooyinka iyo togagga– waxaa laga war haynayaa qulqulka biyaha wasakheysan ee magaalada

Meelaha magaalooyinka ah, bullaacadaha qaada biyaha roobabka badan iyo barafka ku dhalaala jidadka si aysan daadad u imaan. Laga bilaabo halkaas biyaha xawliga ku socda ayaa si fudud ugu gudba dhulka hoostiisa dhuumaha biyaha daadadka.

Xaafadaha badankooda la dhisay wixii ka dambeeyay abayaaqadii 1970-yadii, tuubbooyinka biyaha daadadka waxay si toos ah ugu qulqulaan dhul-daaqsimeedka, harooyinka, togagga iyo webiyada iyaga oo aan wax shaqa ah laga qaban gudahooda.

Habka bullaacdaha ayaa xaafadaha ka difaaca daadadka, laakiin waxa kale oo ay qaadaan daawooyinka cayayaanka lagu buufiyo, kiimikooyinka bacriminta, saliidda la daadiyo, biraha, bakteeriyada, cusbada, qashinka gunta biyaha gala, qashinka kale, iyo qasharka kale ee marinnada biyaha.

### Biyaha roobabka badan ayaa ah isha ugu weyn ee wasakheeya biyaha magaalooyinka.

### Barnaamij sharci ah oo lagu maamulo dhibkan – Sharciga Biyaha Nadiifka ah & barnaamijka Dowladda Hoose ee ruqsadda Habka bullaacadaha (MS4)

**Sharciga Biyaha Nadiifka ah**wuxuu qaabeeyaa Wakaaladda Ilaalinta Deegaanka (EPA) Mareykanka iyo wakaaladaha gobolka uga shaqeeya wasakheynta biyaha iyo dejinta shuruudaha tayada biyaha webiyada, harooyinka iyo togagga.

Qaab-dhismeedka dhexdiisa, **Barnaamij ah ruqsad laga helo dowladda hoose oo gaar ah (MS4) ayaa** lagu maamulaa magaalooyinka bullaacadahooda roobka xooggan balse hay'ado kale ayaa la maamula. Gobolka Minnesota, waxaa u maamusha Wakaaladda Xakameynta Wasakhda Hawada ee Minnesota.

Dadka la siiyo ruqsadda MS4 waxaa ka mid ah magaalooyinka, degmooyinka, biya-qubka degmooyinka, iyo tuulooyinka, iyo sidoo kale xarumo waaweyn sida jaamacadaha, isbitaallada iyo dhismayaasha xabsiga ah ee iyagu ka shaqeeya jidad iyo bullaacado iyaga u gaar ah.

Hay'adaha MS4 waa in ay horumarin ku sameeyaan barnaamijyada looga hortago wasakhda daadadka roobka, waa in ay dadweynaha baraan wasakhda daadadka roobka, oo waa in ay dadka ka qeyb geliyaan xallinta dhibaatooyinka wasakhda daadadka roobka. Ruqsadda waa in ay xafiisyada MS4 aqoonsadaan oo joojiyaan qashin-qubka sharci darrada ah (ee loo yaqaan daadinta aan sharciga ahayn), inay tallaabo ka qaadaan yarenta qulqulka biyaha dhismeyaasha, iyo inay dadka ku tababaraan “nadaafad fiican” si aan loo wasakheyn marinnada biyaha marka la dayactirayo jidadka iyo meelaha madadaalada ama beeraha lagu nasto. Intaa waxaa sii dheer, waxaa jira barnaamijyo ruqsad gaar ah oo lagu maamulo goobaha warshadaha iyo meelaha dhismuhu ku socdo.

**Waxaan rabnaa in dadku ku dedaalo nadaafadda biyaha!**

Learn more about stormwater in Minnesota at www.pca.state.mn.us/water/municipal-stormwater-ms4

# QALABKA lagu MAAMULO ROOBABKA BADAN ee XAAFADAHA

## Balliyada roobabka badan


Dhismeyaasha ganasiga iyo deegaanka ah ee la dhisay ilaa 1980-yadii balliyo ayey adeegsadaan roobabka badan si ay ugu yareeyaan fatahaadda iyo qeyb ahaan qulqulka roobabka badan.
In kasta oo ay balliyadaasi u muuqdaan kuwo dabiici ah, dhab ahaantii waa wax sanco sare lagu sameeyey, oo loogu talagalay in lagu xakameeyo heerka qulqulka biyaha in dib loogu celiyo ilaa ay wasakhda gunta biyaha iyo waxyaabaha adag fariistaan. Balliyada roobabka badan waxay leeyihiin jeebab iyo tuubooyin bannaanka ka muuqda oo u baahan in marmar biyaha iyo qasharka ku urura laga nadiifiyo.

Maaddaama balliyada roobka badan waxaa loogu talagalay in ay ku haraan waxa gunta fariista iyo nafaqooyinka, waxay had iyo goor noqdaan wax cagaaran oo xanjo oo kale noqda xilliga xagaaga. Waa wax caadi ah. In kastoo aad ku arki karto shimbiraha biyaha dul sabbeeya iyo dagiiranta ku dul dageysa balliyada, caafimaadka awgiis LAGAMA kalluumeysan karo oo LAGUMA dabaalan karo.

## Wax-dhisid Dhibaato Yar

Dadka Minnesota waa in ay isticmaalaan wax-dhisid dhibaato yar si loo yareeyo wasakheynta biyaha daadadka. Tabaha guud waxaa ka mid ah dhisidda jidad dhuudhuuban iyo meelo baabuurta la dhigto oo yaryar; si loo ilaaliyo geedaha iyo dhulka u dhow dhismaha; iyo in la isticmaalo baraago iyo waxyaabo kale oo biyaha ku caawiya in ay ku sii qulqulaan dhulka halkii ay uga sii gudbi lahaayeen bullaacadaha roobabka badan.

*TALO: Haddii aad ka fakareyso dhisme ama dib-u-habeyn, kala hadal maamulka magaalada si aad u hesho fikrado ah tabaha Wax-dhisidda Dhibaatada Yar ee aan waxyeello ku ahayn ilaha biyaha ku dhow.*



## Waa in la ilaaliyo balliyada ay galaan roobabka badan iyo dhulka u dhow

Waligaa ha ku tuurin caleemo ama caws la guray dhulka qoyan ama balliyada ay galaan roobabka badan – sidaas in la sameeyo waa sharci darro waxyeello u geysaneysa noolaha iyo deegaanka. Intaa waxaa sii dheer, inta badan balliyada ay galaan roobabla waxaa ku hareereysan dhul uu doog caadi ah ka baxo oo aan laga goyn. Meelahaas dhulka ah had iyo jeer waxaa lagu gartaa khariidadaha bullaacadaha iyo calaamadaha tuubbooyinka biyaha oo mararka qaar calaamad ayaa loo sameeyaa. Meelahaas waa inaan lagu sameyn deyd ama ardaa joogto ah.

## Baraago

Baraagaha waa godad loo naqshadeeyey sidii baaquli weyn oo kale oo waxaa ku keydsama biyaha roobka iyo barafka dhalaalaya ka hor intaysan u gudbin bullaacadaha ama harooyinka iyo togagga u dhowdhow. Biyaha ku jira baraagaha qiiq ayey isku beddelaan oo dhulka ayey qooyaan labo maalmood gudahood.

Mulkiileyaasha guryaha waxay sameysan karaan baraago yaryar oo ay ugu keydsamaan biyaha roobabka ee saqafkooda iyo jidadkooda. Goobaha ganacsiga, waxaa laga isticmaalaa baraago waaweyn oo loo yaqaam keydin iyo nadiifin oo ay galaan roobka agagaarkooda. Intaa waxaa u dheer, dadka Minnesota qaarkood ayaa jidadka ku sameysta baraago marka ay haystaan mashaariic ah dhismeyaal iyo dib-u-dhisid.

Waad ku mahadsan tahay sida aad qeyb uga tahay ilaalinta biyaha Minnesota!

www.pca.state.mn.us/water/municipal-stormwater-ms4

**Wixii faahfaahin dheeraad ah kala xiriir:**

**[Insert local contact here]**